Fu'aad Sh,
Mareegta Farshaxan

# GUDAGALKII HARGEYSA IYO GEESIGII CABDISALAAN TURKI

*Gudguduudka waagiyo saq-dhaxe, maalin kala guurtay*
*Mugdi gaba' cadceed gaasa-baxa, waaga galacdiisa*
*Nimanyahow gumaystaha ku jaray, gaadmo iyo weerar*
*Miinada gumaadkiyo xeryaha, gaadhka lagu meershay*
*Nimanyahow sidii aarka guda, guudka kaga booday*
*Nimanyahow guddoonsadey inaan, godobtu duugoobin*
*Nimanyahow ma guurtada xuska le, geliyey taariikhda*
*Haddaydaan adduunyada gilgilin, xil i ma guuleene*
*Laabtayda kama soo go'een, tix iyo geeraar e*
*Gocashada dareenkiyo murtida, amase guurowga*
*Waxad gaysateen buu ku yimi, gabayga joogaaye*

Galangal,1970 Abwaan Maxamed Ibraahim "Hadraawi"

Mareegta Farshaxan
May 31,2011



Gudagalkii Hargeysa ee bishii May 31dii, 1988kii ayaa sarkaal ka mid ahaa saraakiishii hogaaminaysay ay xabadi kelida kaga dhacdey.Gargaarka caafimaad ee ay fidin karayeen dhakhaatiirtii halganka waxaa curyaaminayey qalab la'aan.Waxaa la gartey in kelida oon tolmo hagaagsan heli karin,jidhka sidii laykugu keeni lahaa loo hawlgalo.Sarkaalkani aan jidhkiisu isqabsan ayaa loo sheegay in ciidamo xoojin ah ay ka yimaadeen galbeedka Hargeysa.Sidoo kale waxaa ciidamo xoojin ah

laga keenay koonfur oo guriga martida la soo dajiyey.Ciidamadii SNM-ta waxaa la gudboonaatey inay dhinacaa goljano u dhaqaaqaan, waxaanay joogeen markan hudheelka yuunyanka"Union Hotel" agagaarkiisa. Markii Goljano dagaalkii muddo socday ayaa sarkaalkaa waxaa furmay nabarkii kelida, hase yeeshee xanuunka nabarka waxaa kala mudnaatey inuu guul ka soo hooyo ciidamada faqashta ee la tubay hortiisa.Dagaalkii baanu sarkaalkaasi halkiisa kaga jiray ilaa dabacsanaan ay heleen ciidamadii SNM-tu,culayskiina ka yaraadey.Guul ayey halkaa ka soo hooyeen ciidamadaas SNM-tu.

Dagaalkii Buuraha ee Oktoober-Nofember 1984[kii] waxaa tilmaan gaar lahaa sarkaal ka tirsanaa ciidamadii SNM-ta.Sarkaalkani waxaa isha kaga duubnayd baandhayj cad.Waxaanu sarkaalkani adeegsanayey il kaliya mudadii dagaalku socday. Waxaa sarkaalkani ku kacey dhiig kar oo kolba dawooyin ayuu adeegsanayaa si uu dagaalka ugu sii jiro, naftiisana uga hiiliyo xanuunkan doonaya inuu dagaalka ka nasto.Sarkaalkani wuxuu naftiisa u huray in jiilka danbe ay nolol wanaagsan ku noolaadaan..Waxaa maankiisu dhex maaxayey tixaha maansadan:

*Waxaa murugo iyo qoomamiyo maanqashiyo ciil leh.*
*Maskax iyo garaad iyo wixii muruqba kaa liita.*
*Markuu adiga sharaftaad mudnayd kaa maroorsado e*
*Naftu inay maqnaato iyo inay mahad ku noolaato.*
*Labadaa mid weeye Maaweelis weeyaan*
*haddii mid u dhexeeyaaye*

Abwaankii Dhoodaan

Bahda Mareegta Farshaxan oo heegan u ah ururinta iyo soo bandhigida taariikh halgameedka bulshada Somaliland ayaa waxay u kuur gashey inay raadiso taariikhda sarkaalkaa intiisa mudnayd u sadqeeyey horumarka iyo cidhiidhi ka saarka bulshada Somaliland.Bahda Mareegta Farshaxan qoraalkan waxay ku xusaysaa gudagalkii dalka ee 1988.

Bishii Juun 26[dii] ,1960[kii] waxaa xornimo buuxda ka qaatey gumaystayaahii reer Yururb gaar ahaan Ingiriiska wadanka Somaliland.Wadankani wuxuu noqday wadankii ugu horeeyey ee shanta Soomaaliyeed ka hoos baxa gacan gumaysi.Waxaa aqoonsi buuxda u fidiyey in ka badan labaataneeyo wadan.Dad fara badan oo ku noolaa wadamo kale ayaa markan go'aansadey in ay ku soo noqdaan wadankooda Soomaaliland.

Dadkaa waxaa ka mid noqday aabo X.Maxamuud Jaamac oo dhamaan hantidiisii ma guuraanka aheyd u gediyey lacag.Xilli ku beegnayd gu'gii 1961[kii] ayaa Aabo X.Maxamuud wuxuu si

buuxda ugu soo raray reerkiisii iyo hantidiisii magaalada Burco ee wadanka Soomaaliland, waxaanu ka soo digorogtay magaalada Nairobi ee wadanka Kenya.Nasiib darase X.Maxamuud Ilaahay umuu qorin inuu neecawda Somaliland ku doogsado,geeridii Ilaahay ayaana haleeshay mudadii lagu jiray ka soo guurka dalkaa Kenya.

Gu'gii 1955kii Aabo X.Maxamuud iyo hooyo Qamar X. Maxamuud Baxnaan waxaa u dhashay wiil ay ugu wanqaleen magaca Turki. Dhalashadaa farxada lihi waxay ka dhacdey magaalada Taala oo qiyaastii ilaa 56 km dhinaca bari uga jirta magaalada Kenya. Waxaa Turki la dhashey Saddex hablood (Sacaada,Saynab,iyo Caasha ) iyo Saddex wiil (Maxamed, Siciid, iyo CabdiNaasir).Dhamaan way nool yihiin,marka laga reebo Maxamed(IHUN). Wuxuu Turki malcaamada ka bilaabay isla magaalada Burco, isagoo dugsiga hoosena ku dhameeyey halkaa . Wuxuu Turki dugsiga dhexe ka galay dugsigii machadka ee Burco, hase yeeshee dugsigiisii sare wuxuu ka bilaabay isla dugsigaa kana dhameeyey dugsiga Allah ee magaalada Xamar oo ka tirsanaa dalkii Soomaaliya.Wuxuu magaalada Xamar u soo wareegay gu'gii 1971kii si uu uga dhameysto dugsigiisii sare.Wuxuuna Turki ka baxey dugisga sare gu'gii 1972kii.

Dabayaaqadii gu'gii 1972kii waxaa la qaadey imtixaan loo galayey ku biirida Ciidamada oo ay hagayeen saraakiil Ruush ah aanay iyaguna saxayeen, Waxaa kalkaaliyaal u ahaa saraakiil u dhashay wadankii Soomaliya laysku odhan jiray aanay ka mid ahaayeen Jaamac Green oo markaa ahaa xoghayaha ciidamada ee Cali Samater, iyo gacan ku dhiigle Gaani oo joogay hogaanka saraakiisha.

Dadka u fadhiistay imtixaankaa waxay tiro ahaan dhamaayeen 132 qof. Imtixaankana waxaa lagu qaadayey saddex luqadood ,iyadoo loo eegayey ardeygu halkuu dugsiga sare ka dhameeyey.Kol haday ahaayeen laba dal oo ku kala hadla afkii labadii gumayste ee kala gumaystay kalana ahaa Ingiriis iyo Talyaani,waxaa soo raacayey Masaarida oo labada dalba ku laheyd dugsiyo ay maalgaliso afka carabigana wax lagu barto.Sidaa darteed ayey saraakiishii Ruushka ahaa tixgaliyeen afka ay ardeydu wax ku soo barteen oo imtixaanka saddexda luqadood loogu afceliyey. Turki wuxuu ka mid noqday ardeydii imtixaanka ku qaadatey afka Carabiga ah.

Waxaa imtixaankaa saxayey, qaadayey, ilaalinayey walibana gacan buuxda ku hayey saraakiisha Ruushka.Waxaa ku guulaystay imtixaankaa 39 qof, halka ay ku guul dareysteen 93 qof. Ka dibna intan gudubtay waxaa loo diray inay soo maraan baadhis caafimaad oo isaguna hawshiisa lahaa. Halkana waxaa ka gudbay 12 qof, halka caafimaad daro ahaan loo reebay 27-ka kale.Haddana Turki wuxuu ka mid noqday 12$^{kii}$ imtixaan iyo caafimaad ahaanba ku gudbay .

Tirada gudubtay waxaa loo qaadey Wadankaa Ruushka. Inkastoo kooxdii ka danbeysey loo qaadey xero ciidan oo u dhaw magaalada Kismaayo si afka Ruushkana loogu baro,laylis milatarina la siiyo.Waxaa la geeyey Turki iyo kooxdii uu la socday magaalada Odays ee cariga Ruushka.

Halkaa waxaa ku sugnaa oo ay ugu tageen ardey kale oo laylis sarkaal ku jiray.Waxaa ardeydaa ay halkaa ugu tageen ka mid ahaa mujaahid Ibraahin Koodadbuur (IHUN),Axmed Xasan Aadan (Axmed Wayso Cade) , Cabdi Shukri ,Daa’uud Daahir, Jaamac Galaal,iwm .Areydan qaarkood waxay ku dhawaayeen gabagabeytii layskii sarkaalnimo,halka qaarkood muddo gaabani uga hadhsanayd.

Waxaa gu’ga ugu horeeya la baran jiray afka Ruushka iyo tababar ciidameed oo carbiska jidhka iyo caqliga u badan.Hase yeeshee ardeyda ka timid dalkii Soomaaliya laysku odhan jiray oo intooda badani maskax furnaayeen ayaa lixda bilood ee ugu horeeyaba afka Ruushka si fudud ugu hadli jiray.Waxaa markaa ardeydaa markii imtixaanka ay heleenba saraakiishii Ruushka ahaa ee saxayey mid walba u qoondeeyeen xirfada ciidameed uu soo baranayo,hase yeeshee ardeydu aanay ka war hayn oo ay uun ogaan jireen markay Ruushka yimaadaan ee loo hawlgaliyo aqoontii ciidameed ee loo qoondeeyey inay soo bartaan.Waxaa markaa loo kala diray ardeydii xarumihii ay tabarka gaarka ah ku baranayeen.Turki wuxuu ka mid noqday areydii lo qoondeeyey barashada hagaajinta iyo kabista hubka sida taangiyada,iwm.

Dhulkan ay areydani tageen waa dhul barafeed dhaxantu ku lamaanan tahay. Degaankii ay ardeydu ka socdaaleena waa degaan xeebeed aan laheyn baraf iyo dhaxan la barbardhigi karo ta Ruushka.Isbadalka hawo, ardeyda oo markay madax la kaceen la soo diray, iyo dhaqankii dhulkaa oo aad uga duwanaa kay ku koreen ayaa saameyn laxaad leh ku yeeshay ardeydan .

Ardey meel iskugu tagtay waxaa dhex marta sheekooyin taabanaya dhinacayada nolosha ee kala duwan.Waxaa layliska Milariga aad loogu badhxi jiray siyaasadii iyo dhaqankii Lenin.Tani marmar ardeydan waxay ku ridaysay qiiro diimeed,marna waxay ku kalifaysay inay falanqeeyaan siyaasadii dhulkii ay ka yimaadeen.Waxaa ardeydan ka mid ahaa koox loo soo diray inay warbixin u gudbiyaan maamulkii Afweyne oo si basaasnimo ah ugu shaqeynayey, warinayeyna sida ay ardeydani ula jaanqaadayaan mabda'a hatiwadaaga iyo dawladii Afweyne. Ardeydii ka soo jeeday dalka iminka la yidhaa Somaliland waxay si niyad furan uga hadleen dhibta ka taagan dalkii Soomaaliya la odhan jiray, gefafka siyaasadeed ee maamulka Afweyne , shuuciyadan laysku anqarinayo,iwm. Tani waxay dhib u keentay ardeydaa ka soo jeeda dalka Somaliland la yidhaa imika in ay mutaan xadhig iyo goobaha waxbarashada ciidameed oo laga eryo.

Abwaanka hiddaha iyo dhaqanka ku xeer dheer ee Muuse Cali Faruur ayaa xilliyadaa ka mid ahaa koox la geeyey Kremlin-ka si ay u soo dhamaan dhay ku sheega shuuciyada.Hase yeeshe xilligaa 1970$^{kii}$ ayaa waxaa Abwaan Muuse Cali Faruur isku qaban waayey casharadii diinta aheyd ee uu yaraan ku qaatey iyo mabda'aas uu qaadanaayo maamulkii Afweyne ,waxaanu qaadan waayey dabeecada ayaa wax walba hogaan u ah abuurtayna.Markuu Abwaan Muuse arintaa liqi karo waayey iskana aamusi waayey waxaa laga soo eryay dugsigii tababarka.

Turki sheeko siyaasadeed uu ka qayb qaatey intuu joogay dalka Ruushka wuxuu ku muujiyey dareenkiisa aan wanaagsaneyn ee ku waajahnaa hab dhaqankii xukuumadii Afweyne. Qaar ka mid ah kuwii dugsiga tababarka sarkaalnimo kula jiray ayaa warkii u soo gudbiyey xukuumadii Afweyne. Hase yeeshee fariintan laga gudbiyey Turki may ku kalifin in laga soo eryo dugsigii. Gu'gii 1976$^{kii}$ horaantiisii ayuu soo dhameystay carbiskii sarkaalnimo, isagoo ku soo takhasusay hagaajinta iyo kabista qalabka ciidamadeed sida taangiyada.

Ayaandaro wuxuuTurki la kulmay markii uu ku soo noqday dalkiisii hooyo,lana hayey fariimihii laga soo gudbiyey ayaa si toos ah Turki loogu gudbiyey xabsiga ciidamada ee Xamar. Danbiga lagu soo oogay Turki waa kacaandiidnimo,maragna looga dhigay ardeydii ay faalo wadaaga ka yeesheen arimaha siyaasadeed ee dalka.Xabsigaa wuxuu kula kulmay saraakiil kale oo ka soo horeeyey iyagana lagu eedeeyey falka kacaandiidnimada ah. Erayga kacaandiid waa eray ay dawladii Afweyne ku eedayn jirtay dadka aanay kalsooni buuxda ku qabin ama aan

dabadhilif dhunkaalan ku sifoobayn.Qaar dil ayey ku mudan jireen,qaarna xadhig dheer iyo jidh dil. Saraakiisha uu halkaa kula xidhnaa waxaa kamid ahaa Mujaahid Cabdiqaadir Koosaar(IHUN) iyo Maxamed Salaan Cawar oo lagu haystay iyagoo xusay maalintii 26$^{ka}$ Juun. Waxaa kalo ka mid ahaa Jaamac Waraabe Caruus oo intii uu joogay Ruushka burburiyey sanabkii Lenin(Statue). Lenin wuxuu ahaa hormoodkii mabda'a hantiwadaaga kana mutay in la sharfo oo mudnaan dheeraadana ah lagu siiyo dalalka qaata mabda'aas.
Kooxdan saraakiisha ah soodayntooda waxaa sabab u aheyd maxkamada milatariga oo xukuntay inay yihiin kacaandiid aaneyna la jaanqaadi karin mabda'a xukuumada Afweyne.Hase yeeshee intii la dili lahaa ayaa la go'aansadey in la geeyo dagaalkii Xabashida iyo Soomalida oo markaa socday si ay halkaa ugu dhintaan.

Turki inkastoo loo sheegay in uu shaqaale ahaan ka tirsanaan doono warshada Kabista ee Hargeysa waxaa loo sheegay in loo gartay inuu ciidanka lugta(infantry) ka mid noqdo ee aagga Jigjiga ka dagaalamaya.Mudo gaaban ka dib ayaa Jigjiga gacanta lagu dhigay,loona badaley aaggii kale ee uu dagaal ka socday oo markaa Herer ahaa si dhimashadiisa loogu hogaamiyo. Ilaahayse muu qorin inay maalintiisii noqoto,inkastoo raggii la socday uu Maxamed Salaan Cawar(IHUN) ku dhintay dagaaladii Goday.

Turki waxaa lagu darey inuu ka mid noqdo ka dib Gaaska Koowaad ee Lughaya. Waxaa taliye ka ahaa Maxamed Faarax Caydiid .Waxaa Turki halkaa uu la joogay oo xidhiidh wanaag ka dhexeeyey Xaashi Cali iyo Daa'uud Mahadleh oo ka soo jeeday dhamaan beelaha Hawiye. Dhinaca tirokoobka ciidamada wuxuu Turki ka diiwaangashanaa shaqaalaha warshada kabista.

## Hanaqaadkii Halgankii Mujaahidka:

Gu'gii 1979kii Waxaa socdaal shaqo ku yimid Magaalada Hargeysa Mujaahid Maxamed Xaashi "Lixle"(IHUN) oo ahaa hogaanka sare ee warshada Kabista wadankii la isku odhan jiray Soomaaliya. .Wuxuuna Lixle hayey tirokoobka shaqaalaha warshada Kabista ee Hargeysa. Maalintaa ayuu Lixle ku soo wareejiyey warshada kabista ee hargeysa.

Magaalada Baydhabo xilliyadaa waxaa ku kulmay oo shaqaale dawladeed ka ahaa Maxamed Halac oo ahaa sarkaal Booliis ah, Maxamed Isxal iyo Cabdiraxmaan Dhagax oo ahaa saraakiil ciidanka qarankii Soomaaliya .Kulankani wuxuu fudueeyey inay hawlaha halganka dahsoon si fudud u wadi karaan. Xidhiidhkan fududaadey wuxuu kaloo keenay inay si hawl yar ula xidhiidhi karaan saraakiishii gobolada dhex joogtay sida Aadan Shiine(IHUN),Maxamed Kaahin,Xasan Yoonis (IHUN), Axmed Dhagax(IHUN),iwm.

Horaantii gu'gii 1980[kii] ayaa Lixle (IHUN) u soo diray warqadii fasaxa iyo kharashkii safarkaba Turki. Xilligan ayey labada sarkaal si xeeldheer u wada hadleen oo Lixle la wadaagey Turki hawlihii dahsoonaa ee halganka, una sheegay inta looga baahan yahay ka dib markuu Turki ogolaadey inuu wixii kala soo gudbaanada xilkaa heegan u yahay. Lixle markaa Kitaabka Quraanka ayuu ku dhaariyey Turki in dahsoonida hawlagalada la dhawro,hawlahana sida ugu haboon loo fuliyo, iyadoo uu u sheegay in Hargeysa markuu ku noqdo ay saraakiisha halkaa joogtaa la soo xidhiidhi doonto. Intaanu Turki ka anmabixin magaaladii Xamar ayuu Lixle helay warqad shaqo ka joojinta, loona badalayo xafiiska madaxtooyada.Hawlaha uu Mujaahid Lixle(IHUN) ku jiray darteed iyo xilka halgameed ee dahsoonaa ayey arintani ku keenaysay curyaamin, sidaa darteed wuxuu Mujaahid Lixle dalbadey shaqo ka fadhiisin in la siiyo.

Dabayaaqadii 1980[kii] ayuu Turki ku soo noqday magaalada Hargeysa.Waxaa Cabdisalaan u yimid oo hawshii loo soo dhaariyey la sii anmbaqaadey Maxamed Cali Shaxaari oo isna u kaxeeyey si uu ula kulmo Maxamed Cilmi Galaan oo ahaa taliyaha ciidamada cirka, hawshan dahsoona ka oday ahaa dhinacan.Waxaa markaa loo xilsaarey Turki inuu ka sameeyo tirokoob warshada kabista, Guutada 24[aad], ciidanka deganaa Dabada-Cadaada,guutadii 22[aad] ,iwm. "Hawluhuu Mujaahid Lixle u diray Mujaahid Turki waxa ka mid ahaa wacyigalinta saraakiisha iyo dablayaasha (mobilization)"sidaa waxaa ku daray Mujaahid Maxamuud Maxamed Xayd(Ina Ganbadh) oo ka waramayey hawlihii tirada lahaa ee uu Mujaahid Turki loo xil saarey fulintooda.

Xilligani Mujaahid Turki wuxuu ka mid ahaa saraakiisha dhalinyarada ah,hase yeeshee wuxuu lahaa firfircooni dheeraada."Wuxuu ahaa saraakiisha cusub ee dhalinyarada ah kuwa ugu firfircoon,hawlqabashadana ku wanaagsan" ayuu yidhi Mujaahid Maxamed Cilmi Galaan oo ka warameyey kulankii ugu horeeyey ee dhex maray isaga iyo Mujaahid Turki.

Gu'gii 1980[kii] waxaa shaqo ka fadhiisad loo ogolaadey Lixle ,waxaanu yimid Hargeysa. Markan Lixle wuxuu la kulmay Cabdilaahi Kaahin, Maxamed Cilmi Galaal,Saleebaan,Cabdi Duse oo isna la soo badaley,iwm.Ayaandaraose waxay dhacdey markii go'aan xaggii dawladii Afweyne ka yimid amraya in lagu soo badalay gacan ku dhiigle Gaani.

Waxaa markan iska daba dhacey hawlo badan oo hawlihii dahnsoona ee dalkii Soomaaliya laga wadey daaha ka siibay.Waxaa lagu dhawaaqey ururki SNM bishi 6[dii] April,1981. Waxaa la xidhxidhay dhalintii UFFO dhamaadki 1981.Waxaa dil badheedh ah lagula kacey mujaahid Cabdilaahi X. Siciid(IHUN) bishii January 27[dii], 1982[ka] oo loo tiriyo hormoodkii SNM.Bishii Febraayo 20[dii] waxaa dhagax ku dagaalamey ardeydii iyo hooyooyinkii dalka Somaliland.Waxaa markaa baxey ciidankii ugu horeeyey ee ay SNM yeealato oo ahaa ciidankii Afraad oo uu hogaaminayey mujaahid Maxamed Cali,waxaa kaloo baxey saraakiishii ugu horeysey ee Aadan Shiine iyo Axmed Dhagax.Maalmo dabadeedna ay ka daba baxeen saraakiisha Maxamed Kaahin iyo Aadan Saleebaan.

Markay arimahani xaaladii isbadal weyn ku sameeyeen ayaa maamulkii Afweynena soo badaley gacan ku dhiigle Gaani si kalsooni buuxda uu Afweyne uga helo dhinacan.Waxaa kalsooni buuxda uu Afweyne ku qabi waayey General Salxaan oo muujiyey maamul wanaag,dadweynaha reer Hargeysiina aad u jeclaayeen ilaa xataa odayaashu codsi ay soo jeediyeen uu sababay inuu Salxaan u dalaco darajada "general". Codsigani oo uu diidi kari waayey Afweyne waxay ku kaliftay inuu safarkuu Hargeysa ku joogay u sii dhaafo gobolada dhexe si uu darajada General deeq tolnimo u siiyo Dad_qalkii Hargeysa Morgan iyo Gacan ku dhiigle Gaani oo Hargeysa loo soo badalayey.

Waxaa markan Gaani la soo badaley socday hawlihii iskaa wax u qabso ee ay hogaanka u hayeen ururkii dhalinyarada ahaa ee UFO. Haddaba Gaani ayaa isku dayey inuu marmarsiiyo u helo aqoonyahanadan oo uu maqlay inay dhakhaatiirtu hageyso. Gaani wuxuu keenay askari xanuunsanaya dhakhtarka. Wuxuuna warsadey dhakhtarkaa markaa joogay cisbitaalka , oo loo sheegay inuu ahaa dhakhtar Saalax oo reer Marka ahaa kuna mashquulsanaa gargaar uu u fidinayey hooyo umulaysay.

Muddo markii uu sugay Gaani ayaa loo sheegay inuu qolka qalniinka ku jiro gargaarayana hooyo umulaysa, markuu dhakhtarkii soo baxey wuxuu amray in la xidho loona gudbiyey xeradii qaybta 26aad. Hase yeeshee wuxuu af-kala qaad dhacey markii loo sheegay inuu soo daayo dhakhtarkaa oon danbi galin aan una dhalan goboladii woqooyi ee reer Marka ah,waxaanu Gaani jawaab naxdin leh ku celiyey " Maxamed Cali Samater ayaa igu soo balamiyey inaan shaqo ka qabto dhakhaatiirta u dhashey gobolada woqooyi ee hawlaha dibuhabeynta ku jira".
Isma og aqalkii bay goglaysaayee markii loo sheegay dhiigyocab Gaani inaanu ninkaasi ka soo jeedin goboladan woqooyi (iminkana ah Somaliland) ayuu Gaani amray siideyntiisa markiiba isagoo la yaaban waxa waxqabad ku kalifay haddaanu goboladii woqooyi ka soo jeedin .

Xilligan mujaahid Turki wuxuu ka mid noqday saraakiishii dhalinyarada aheyd kuwooda ugu firfircoon ee hawlahan dahsoon wadey.Horaantii 1982[kii] Waxaa xadhig lagula beegsadey saraakiil dhawr ah oo ay ka mid ahaayeen Ibraahim koodadbuur, Ina Cabdi Qarax, Ina Dubad,Turki,iwm.Muddo markay jeelka Hargeysa ku sugnaayeen ayaa la isla gartay in jeelka Xamar loo badalo. Xilligan waxa socday dagaalkii Balanbale oo saraakiisha ciidamada iyo dawladuba ku mashquul ahaayeen.Ina Cali Samatarna halkaasuu ku maqnaa.Taliska ciidamada waxaa markaa haysta Axmed Cidhiidhi,waxaana abaanduule ka ahaaSahal Axmed Sahal,halka uu taliye ku xigeen ka ahaa Cabdilaahi Kaahin oo la tashaday saraakiishii kale ee markaa Xamar joogay laguna go’aansadey in qorshe saraakiishan xidhan ee Hargeysa laga soo badalayo lagu badbaadiyo lala yimaado. Markaa ayaa Cabdilaahi Kaahin u tagay Axmed Cidhiidhi una sheegay in saraakiil laga soo badalayo Hargeysa,sidii loo qaabili lahaana looga fadhiyo inuu amar ku bixiyo. Axmed Cidhiidhi wuxuu amar ku bixiyey in la dajiyo meel cudoon. Qoladii wadey ee maxaabiis ahaan u wadey saraakiisha ayaa yaabey sida loogu diyaarka yahay soo dhaweyntooda, xilkiina lagala wareegay iyagoo u haysta in xabsi kale loo sii gudbinayo. Sidaasay xabsigii kaga badbaadeen saraakiishaasi,muddo ka dibna dib loogu soo celiyey dagalkii ay ku barbaareen ee Hargeysa.

“Mujaahid Ibraahin Koodadbuur markan uu Xamar ka yimid waxaaba u soo korodhay xiddig kale oo wuu soo dlaacey” sida waxaa sheegay Khadar Aadan Koodadbuur oo markaa ardey ka ahaa dugsiga Ida July ,guriga adeerkii Ibraahin Koodadbuurna(IHUN) joogay.

Waxaa markan si badheedh ah oon qarsoodi laheyn loo gudogalay hawshii halganka.Maxamed Xaashi Lixle wuxuu tagey Gaashaamo, Turkina wuxuu u baxey Jabuuti si uu uga soo qaado qalab isgaadhsiineed oo markaa halkaa inay soo gaadheen la soo sheegay. Waxaa markan Turki jid mariye u noqday Faarax Suulow oo marinkiisu ahaa jidkaas.Hase yeeshee markii uu Turki gaadhey magaalada Jabuuti ayaa loo sheegay in Cabdilaahi Askar qalabkii qaadey dhinaca Qaahirana kala soo wareegayo. Turkina dhinacaa Diridhaba ayuu ka soo galay dalka Itoobiya. Ibraahim Koodadbuur markan waxaa loo gartay inuu si dhaw ula shaqeeyo maamulkii qaybta 26aad si xog badan uu u helo aananu dalka ka bixin.

**Hawlgakii Birjeex:**

*Dooddigii Mandheeree*
*Laga qaxay dayaankiyo*
*Darban baan ku dhaartay*

*Dhabbad iyo Gal-dogob iyo*
*Digtii warayaal iyo*
*Duman baan ku dhaartay*

*Birjeex deedankeedii*
*Laga diday kulkeediyo*
*Degsan baan ku dhaartay*
*Daalaley(Hadraawi)*



Waxaa markaa magaalada Gaashaamo iskugu yimid saraakiil ay ka mid ahaayeen Turki, Cabdialaahi Askar ,Maxamuud Maxamed Xayd, Maxamed Xaashi Lixle,iwm. Waxay go’aan ku gaadheen in gudaha dalka la galo qorshe balaadhan oo maamulkii xilligaa ee dhulka iminka wadanka Somaliland ah gacanta lagu dhigo,shaqana laga qabto xubnihii maamulka hayey markaa.

Markay marayaaan tuulada Samatar Axmed ayey la kulmen Cali Bashe oo gaadhigiisii Isuzu-ahaa ku qaadey ilaa Burco. Xayd iyo Lixle waxay ku hadheen Burco, Cabdilaahi Askarna waxaa soo qaadey Ina Maxamed Xariir.Turkina waxaa soo qaadey mujaahidka ku magac dheeraa Foosto ahaana taksiile,waxaana si lama filaan ah u soo raacey Cali Baaquli. Markay

Berbera soo galeen dhulkuna uu bandoo ahaa ayaa wadadii la xidhay si loogu baneeyo wafdi uu Afweyne hogaaminayey oo Berbera ka soo degay una socday Hargeysa.

Hawlaha dagaal ee lagu jiray waxay keensadeen in magac cusub lala baxo oo magaalooyinka lagu dhex joogo.Magac dagaalka Lixle wuxuu ahaa Kheyre,halka uu Turki markaa ku hawlgalayey Cabdisalaan oo noqday magac dagaalkiisa.

Cali Baaquuli wuxuu kaga hadhay Berbera. Foosto iyo Cabdisalaan Turkina waxay u soo dhaafeen dhinacaa Hargeysa iyagoo diyaar u ah in haddii askarta Kontoroolada fadhidaa ishortaagaan dagaal hor leh kala hortagaan.Waxay yimaadeen magaalada Hargeysa , lana kulmeen Ibraahim Koodadbuur oo siiyey warbixinta ah in ilaa 500 oo nin u diyaar yihiin fulinta hawshan iskuguna jira askar,saraakiil, ganacsato ,iwm. Waxaa kulamada ugu badan lagu qaban jiray gurigii mujaahid Ismaaciil Sh.Ibraahin.

Dhulka iminka ah wadanka Somaliland wuxuu ku jiray xaalad bandoo ah. Bishii April 8,1983 waxaa waxaa la wada joogay guriga Ismaaciil Sh.Ibraahin oo lagu soo bandhigay in sahankii magaalada la dhameeyey,sidii loo fulin lahaa dilka madaxdii xilligaa joogayna la qorsheeyey.Ibraahin Koodadbuu wuxuu xidhnaa labiskii sarkaalnimo una diyaargaroobey inuu geeyo Cabdisalaan Turki iyo Cabdilaahi Askar gurigii ay u hurdo tagi lahaayeen.Xilligan ganacsato iyo shaqaale dalwadeed ayaa kireeyey guryo dhawr ah si ciidamada SNM ee hawlo loo soo diro ay u galaan.Ragaas waxaa ka mid ahaa Axmed Subeyr, Axmed Yuusuf Iimaan,iwm.Markaa Cabdilaahi Askar ayaa codsadey inuu iska sii yara joogayo. Ayaandaro Cabdilaahi Askar oo dibada u yara baxey ayaa dhalinyaro u shaqeynaysay xisbigu gacanta ku dhigeen mayse garaneyn ee baastoolada ay ka heleen awgeed ayey xarunta xisbiga ugu xidheen. "Waxaa markiiba soo ogaadey Khadar Cali Dankali oo qorshahayagan ogaa,dawlada hoosena u sahqeynayey, kana mid ahaa ragga xubnaha SNM ee dalka jooga taageerada qarsoon u fidin jiray"ayuu yidhi Mujaahid Cabdisalaan Turki.Warkii ayuu Khadar la wadaagey mujaahid Ismaaciil Sh.Ibraahin oo isna sii gaadhsiiyey Mujaahid Ibraahin Koodadbuur.

Aroornimadii ayuu Muhaahid Ibraahin Koodadbuur ku kalahay miiska saraakiisha oo Cabdilaahi Askar loo qaadey.Ibraahim koodadbuur wuxuu soo hubiyey halka uu ku jiro,sida loo ilaalinayo iyo siday suurtogal ku tahay la soo bixistiisu.Warkii markuu u soo gudbiyey

Cabdisalaan Turki oo isna u hawlgalay dajinta qorshihii la bixida Cabdilaahii Askar u suurogali laheyd .

Dhacdadani waxay jagaafaha u laabtey qorshihii la damacsanaa ee dalka gudihiisaba loo soo galay, iskuna badalay sidii horta Cabdilaahi Askar loo badbaadin lahaa. Waxaa laga soo xushay tobaneeyo nin oo ka mid ahaa ilaa 500 oo nin ee diyaarka u ahaa qorshaha balaadhan.Waxaa layskugu yimid guriga Ismaaciil Sh.Ibraahim oo lagu daawadey laba cajaladood oo Fiidyoow ah oo ka waramayey sida qorshayaasha noocan oo kale loo fuliyo,midi waxay aheyd dilkii Patrice Lamuumbe oo ahaa hogaamiyihii dalka Kongo ahaana ra'iisal wasaarihii ugu horeeyey ee dalkaa,halka ay ta kale ku saabsaneyd dagaalkii Labaad ee aduunka.

Mujaahidiintan iskugu timid guriga Ismaaciil Sh.Ibraahim waxaa ku jiray Biixi X.Xasan Cilmi oo markaa xidhnaa iyo Aadan Maal oo isna xidhnaa.Biixi intuu kaadi uu baxey ayuu deeyrka ka boodey.Cabdisalaan markaa wuxuu diyaariyey khidadii lagu hawlgalayey. Waxaa la keenay labadii gaadhi ee hawlgalka lagu fulin lahaa.Ganacsatadii magaaladuna waxay soo ururiyeen kharashkii hawlgalka."

Gaadhi ka mid ah labadii gaadhi oo hashkadeeyey darteed wadadii hore waa la badaley.Wadada hore waay aheyd in Sheekh Biliso la hor maro,halka loo badaley in guriga madaxtooyada iminka SOmlailand la hormaro. "Markii uu baabuurkii oo hashkadaynayaa noo kacay ayaannu isagii nidhi na hor soco si aanu u ogaanno in uu is-taagay iyo in kale. Markii aanu gaadhney geerashka Ina Abu-site ayaannu baabuurkii saddexdu saarnaayeen dhaafnay oo hor gallay. Waxa aanu ku nidhi soo soco oo hawshaadii qabso. Waajibkoodu waxa uu ahaa inay albaabka shishe ee miiska ee galbeedk xiga ay istaagaan oo ay gaadhka halkaa jooga naga khaarajiyaan. Annaga oo siddeed ahayn-na waxay hawshayadu ahayd in aanu albaabka soke ee bariga soo xiga ka gallo oo gaadhka gudaha ku jira kala calaf-qaadno" sidaa waxaa yidhi Ibraahim Maal oo uga sheekaynayey siduu hawlgalkaasi u dhacey Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe). Hawlgalkani oo dhameystiranina qoraalka Boobe Yuusuf ayuu si faahfaahsan ugu xardhan yahay.

Markii gudaha la galay ayaa Cabdisalaan Turki iyo Ibraahim waxay ku qornaayeen jabinta qufulka qolka uu Cabdilaahi Askar ku jiro.Cabdisalaan Turki ayaa jabiyey qol kale oo uu ku

xidhnaa sarkaal la odhan jiray Geedi oo qabiilka Hawiye ka soo jeeday. Hase yeeshee mar labaadkii ku guulaysteen Cabdisalaan iyo Ibraahim inay qolkiina jabiyaan ,Cabdilaahi Askarna fuushiiyaan gaadhiga. "Dhawaaqii Cabdillaahi Askar kadib, Cabdisalaan Turki ayaa albaabkii gacanta ula tegay, Ibraahim Koodbuurna qoriga dabbadiisa ayuu ku dhuftay, markaasuu mar labaadna ku celiyay oo ku dhuftay. Waxa jabay albaabkii" ayuu yidhi Aadan Maal. "Kaabada qolka ayuu Biixi fuushana oo xabad wajigayga martay ayaa kalida kaga dhacdey".ayuu Yidhi Cabdisalaan Turki oo ka waramayey hawlgalkaasi.

"Bishu waa April,
Toban beriyo laba,
Bandhig Ciidamadu
Isu soo baxeen,
Waxay baawariyo
Baaruud hayeen,
Badka soo dhigeen,
Baa Askar lagala baxay
Waxa la yidhi Birjeex,
Waxa helay Badjeex.
Badhbadhaadhnaydii,
Ba'ay baa xigtaa,
Boobow la yidhi."

Abwaan Aadan Tarabi Jaamac

Hawlgalkaasi guul ayuu ku dhamaadey mucjiso ah in gaadhigu markuu Xarshin gaadhey wayaalaha la ogaadey ay ka mid ahaayeen.Bee-bee soo qabashadooda loo xilsaarey intuu xurfad ku dhacey ayaa ragii la socda mid ka mid ahi wuxuu dusha kaga tuuray geed oo uu ka laad-laadiyay, mid kalena dhulka ayuu ku dhacay oo luqunta ayuu wax ka noqday. Shidaalkii Hargeysa laga shubay ismuu dhimin oo markii la gaadhey Xarshin ee la eegay sidii buu u buuxay.Qasabada shidaalka ayaa dalool gaadhey ka dib markii xabadi ku dhacdey."Boobe Yuusuf Ducaale ayaa ka mid ahaa dadkii aroornimadii geeyay gaadhigaa geerashka" ayuu intaa ku daray Cabdisalaan Turki.

"Shirkii 1984 ee golaha dhexe ee SNM,saraakiisha aad loo hadal hayey waxay ahaayeen Cabdisalaan Turki iyo Ibraahim Koodadbuur" ayuu yidhi Maxamed Ismaaciil Beergeel oo shirkaa ka qayb galay.Waxaa shirkaa hadalhayn ku lahaa hawlgalkaa Birjeex oo muujiyey awooda ay SNM leedahay, sidoo kalena soo bandhigay taagyarida ciidamadii Afweyne.
Guulaha laga hantay Hawlgakaa adjeex(Birjeex) waxaa lagu soo qaadan karaa kuwan:
-Itoobiya oo aqonsatey kartida SNM iyo siday uga duwan yihiin jabhadii SSDF.

-Kalsoonida xubnihii SNM-ta oo korodhay

-Taageerada gudaha iyo dibada ee SNM-ta oo kor u kacdey

-Dadweynihii oo helay wacyi galin waaqici ah.

-Dawladii Faqashta oo kordhiday cadaadiska kuna baahisay degaanka oo dhan.Tani waxay kordhisay xubnihii ku soo biirayey ururka SNM.

-Korniin ku yimid hab fikirkii xubnaha SNM iyo dibu-habeyn lagu sameeyey qorshihii dalka loo soo galay marka horeba ee dilka saraakiishii, maamuladii, iyo hormodkii dawlada faqashta ahaa.

-IWM………

## Dagaalkii Buuraha:

Dabayaaqadii 1984 waxaa loo hawlgalayey dagaalkii Buuraha. Ku dhawaad bishii Sebtember 15,1984 Waxaa sahan ahaan u soo baxey Cabdisalaan Turki, Axmed Xasan Wayse Cade, Mahdi Isxal, Axmed Aw Cali Shabeel, iyo Daa'uud Daahir .Waxaa markaa mujaahidiintan kula kulmay aaga Aneeya, iyagoo sahay buuran wada Cabdialaahi Cabdi Good iyo Ismaaciil Sh.Ibraahim.

"Abaarso ayey Cabdialaahi Cabdi Good iyo Ismaaciil Sh.Ibraahim kula kulmeen xubno a tirsan mujaahidiintii SNM aynaka mid ahaayeen Axmed Aw Shabeel,Axmed Xasan Aadan "Weyso cadde" iyo Mahdi Isxal "Cabdiraxmaan Baqdaadi oo arintaa ka waramaya ayaa sida noo sheegay.

Cabdilaahi Cabdi Good oo sahaydaa ay gudbiyeen qiimeeyey ayaa u anbabaxey Jabuuti si uu daynta uu bixiyo.Waxaa markaa sii ururiyey lacagtaa oo Cabdilaahi Cabdi Good la kulmay mujaahidiinta ay ka mid ahaayeen Abshir Nuur,Iid Cali Salaan,Daahir Xaashi, iyo Cabdiraxmaan Baqdaadi. Waxaa kaloon kulankaa ka qayb galin Maxamed Yaasiin Colaad oo Dubay ku maqnaa iyo Maxamed Axmed Xirsi Fao shaqo khusaysa ururka FAO darteed duleedka magaalada Jabuuri ugu maqnaa.Axmed Aw Cali Shabeel wuu ku socod badnaa aaga Abaarso oo nin beer Gowlbog oo Abaarso woqooyi ka xigta kana soo sokaysa Uudaan ku taala ayuu inta badan ku soo dagi jiray.

Ciidankii Buuraha soo gali lahaa ee dhinaca galbeedka waxay taagnaayeen Lafo Ciise waxaana halkaa ku hayey oo la joogay Xasan Yoonis Habane . Ciidanka Bariga Abokor yare , Garandaash, iyo Aadan Saleebaan Cali,.Ciidamada Dhexe waxaa gacanta ku hayey Ibraahin Dhagaweyne. Ciidan todobaatan ahaa oo loogu talo galay gurmadka galbeedka iyo dhexda, jidgooyada galbeedka iyo dhexda waxaa gacanta ku hayey Maxamed Xasan Aadan "gacmo Dheere".

Markii uu dhaqaaqii iyo gudagalkii soo dhawaadeen, niman dhalinyaro oo farabadan ayaa soo raacey saraakiishii ciidanka ee LafoCiise. Saraakiishaasi (Aadan, Shiine, Cabdilaahi Askar, Muuse Nadiif, Mahdi Cali Faarax) waxay isla qaateen inay shir galaan. Laba maalmood ayey qaadatey iyadoo laga doodayey arimo ay ka mid ahaayeen:

-Ma Dilla iyo Kalabeydh dhexdooda oo Jufa Uurey ayaan ka galnaa,-Mise Tulida Cagaagan iyo Gorayo Cawl dhexdooda ayaan ka galnaa?

Hogaanka ciidanka waxa hayey markaa Axmed Cabdi Qaraash (IHUN), Ibraahin Sh.Aadan Cali Geele(IHUN),Jabhadii afraadna Dhuxul.Dhalinyaradaa oon tabar hagaagsan qamin,hace yeeshee niyad wanaagsan hayey ayaa sugi kari waayey inta go'aan la qaadanayo, isla habeenimadii ayeyna qaadeen jidka u dhaxeeya Tulida Cagaagan iyo Gorayo Cawl.Waxaa markaa raacey Cabdilaahi Askar.

Bishii Oktoober 17,1984 ayaa dagaal hor lihi ka dhacey aagaa Burco Duuray, waxaana halkaa ku shahiiday mujaahidiin tiro badano oo uu ka mid ahaa Lixle. Geerida Lixle oo la filayey inay niyadjab ku keento ciidamadii SNM may dhicin.Waxaana la galay dibu habeyn xeelad dagaal horena loo sii socday.

Bishii November 5,1984 ayey mujaahidiintii aaga galbeed oo ku jiro Mujaahid Cabdisalaan turki socod ku mareen Aw Bare, ilaa iyo Tuli Caal.. Waxaa xusid mudan xilligan in mujaahid Cabdisalaan awood u helay u adkaysiga xanuunka kaga imanaya xubin ka mid ah jirkiisa.Waxaa Mujaahid Cabdisalaan soo foodsaarey wadnoqabad(stroke),waxaana qayb weyn ka qaatey dhiigkar uu lahaa oo kor u kacey,waxaa isbadal ku dhacey qaab dhismeedkii wajigiisa oo isha midig way qaloocsantay.Waxaa mujaahid Cabdisalaan uu tagey Herer kana soo qaatey dawadii dhiigkarka, ishiina waa la soo duubay.Xilligani xanuunka xubnaha jidhkiisa waxaa mujaahid

Cabdisalaan kala mudnaa halganka.Dagaalka Buuraha wuxuu ku dhameystay Mujaahid Cabdisalaan isagoo xanuunkiina hayo ay ishiina duuban tahay.

"Mujaahid Cabdisalaan wuxuu ahaa sarkaal aan jiidaha hore ee dagaalka ka fogaan, halka saraakiil kale tagista jiidaha dagaalku ay ku yareyd oo ay u digoroganayeen siyaasiyiin"sida waxaa yidhi Maxamuud Beergeel oo ka waramayey aqoontuu u lahaa Cabdisalaan Turki.Maxamed Beergeel oo hadalka sii wata ayaa sheegay in la odhan jiray Cabdisalaan Turki waa Lixloo da' yar.

Markii dagaalkii Buuruhu dhamaadey ayuu Cabdisalaan bishii Febraayo 1985 tagey Addis-ababa,una sii dhaafey Qaahira.Dhaktar(prívate clinic) uu lahaa dhakhtar ka shaqeyn jiray Jaamicada Caynu-shamsi ayaanu dawo ahaan u tagey.Waxay mujaahid Cabdisalaan halkaa ku kulmeen mujaahidiin iyaga laftigoodu soo dhaawacmey ayna ka mid ahaayeen Jaamac Dheeg,Cali Guray, Musmaar,iwm.Markii dawadii u dhamaatey ayaa isagoo u sii jeeda jiidihii hore ee dagaalka ayuu go'aansadey Mujaahid Cabdisalaan Turki inuu sii cimraysto.Dadka aqoonta u leh mujaahid Cabdisalaan Turki waxay ku tilmaamaan inuu ka mid ahaa kooxaha wadaadada,waa nin aqoon diimeed leh,ku dhaqankeeduna aad uga muuqdo.

Waxaa markaa uu Cabdisalaan la kulmay jaaliyadii reer Soamlialnd ee deganaa Sucuudiga siiyeyna warbixin hufan oo ku saabsan dagaalka.Dadkii uu halkaa warbixinta ku siiyeyna waxaa ka mid ahaa Maxamed Beergeel. Cabdisalaan Wuxuu ku soo noqday jiidihii hore ee dagaalka si uu u dhameystiro halgankii uu u dhaartey,gacantana ugu dhigo guushii uu la doonayey faca soo koraya.

Cabdisalaan Turki waxaa u dhaxdey Layla Abokor Cabdilaahi una laheyd afar caruur ah. Layla waxay dusha ku ridatey xilka guriga iyo caruurta.Waxaa Layla dhib badani uga timid hay'adihii nabad sugida, hangash, iwm. Markii danbe Laylii waxay goosatey inay shaqadeedii dhakhtarka weyn ee Hargeysa iskaga tagto. Waxay Laylii aheyd umuliso.

Dr.Axmed Cali Askar ayaa mudo kooban laga dhigay isuduwaha Dhakhtarka Hargeysa. Dr. Aadan Beergeel ayey mudadaa gaaban dhexdeeda u suurtogashey in uu albaabada u furo dhakhtarkii ugu horeeyey ee lagu daryeelo hooyooyinka si ay ugu umulaan.Shaqaalihii dhakhtarka oo dacweeyey darteed ayuu maalin yimid gudoomiyihii Gobolku guulwade Buule.

"Miyaanad ogayn in aan dhakhtar keli loo leeyahay la furan karin" ayuu Buule ku yidhi Dr.Aadan beergeel.Hase yeeshee Dr. Aadan wuxuu u sheegay in maalinta la soo cadeeyeo qof bukaan jiifa oo dhakhtarka jiifa ama dawo ku qaadanaya loo aqoonsan karo rugtan inay tahay dhakhtar.Waxaanu Dr.Aadan beergeel cadeeyey in guryahaba lagu ummulo kana uu yahay meel ay hooyadu ku umulayso.Xaaskii guulwade Buule oo dawo fiican ka heshay rugtan caafimaad ee Cosob ayaa indhihii Buule sii jeedisey . Layla Abokor oo markan raadinaysa shaqo ayaa shaqo ka bilawday Rugtan Caafimaad ee Cosob,aadna ugu riyaaqdey sida fiican eeloo qaabilay.

"Waanu ogayn inay Laylii tahay xaaskii Turki, hase yeeshee arimahaa xilligaa lagama wada hadli jirin,xataa maalmo ay dabaylka tagtay waanu ogayn" waxaa yidhi Dr. Beergeel oo rugtaa maamulkeeda gacanta ku hayey.Waxaa ayaandaro ah in maamulkii faqashtu dhakhtarkaa miino ku qarxiyey,ka dib markay wixii agabkii dhex yaaley gurteen. Muuqaaladana waxa nala wadaagey Dr.Aadan Beergeel sheegayna inay markii hore qoryaha waaweyn kurideen si ay u dumiyaan.Guriga oo shub ahaa ay qoryahaasi waxba yeeli waayeen,ka dibna qalabka miinada loo adeegsadey dumintiisa. Waa dal nimaan laheyn ka duminayo cidii laheyd.





Bishii Diisambar 17 ayaa warqad loo keenay Layla.Warqadaasi waxay daaha ka rogaysay in hawlgal weyn laga samaynayo Hargeysa,dadka ay dawladii faqashtu u dhibi doontana ay ka mid tahay.Markaasey Laylii goosatey inay dhinaca Itoobiya gasho.Hawlgankani waa dilkii gacan ku dhiigle Axmed Aadan oo haystay xafiiskii nabad sugida dhaceyna bishii Diisamber 26,1986.

Mudo ka dib ayey caruurtii ugu timid Burco kana kaxeysatey. "Waxay aheyd markii aniga iyo hooyadey oo caruurta Hargeysa ka soo kaxeysay aanu erayo is nidhaa waynaymudana aanuu is eegnay,aniga iyo caruurtii waxaanu kornay gaadhigii Itoobiya tagayey,hooyana way na sii eegaysay"ayey tidhi Layla oo ka warameysay maalintii ugu darneyd.Iyadoo sii wada hadalkan waxay tidhi" Hooyo waxaa u muuqatey inay ilmaheedii iyo caruurtay ayeyda u aheyd geeri u

sahay qaateen,kol hadaan cidi hubin in la nabad galayo iyo in dhexda lagu qaban doono mid uun".

# Gudagalkii Dalka:

Bishii Abril 1988 ayaa heshiis ay kala saxeexdeen labadii dawladood ee Soomaliya iyo Itoobiya.Maalintani waxay SNM-ta u aheyd farxad iyo reynreyn. "Maalintaa waxaa joogay Diridhaba kuna sii jeednay jiidaha hore, waxay aheyd maalin farxad leh.Waxaaney dardar galin hor ku sameynay hawlihii dagaalka" sida waxaa yidhi  Mujaahid Cabdisalaan oo ka waramayey dareenkii mujaahidiintu kaga falceliyeen heshiiskaa.

Xilligan waxaa jeelka Herer  ku jiray saraakiil hormood  ka ahaa halganka.Waxaana bixinta amarkaa loo tiriyaa gudoomiyihii xilligaa ee SNM, iminkana ah madaxweynaha Somaliland Axmed Maxamed Maxamuud"Siilaanyo". Dhacdadani waa markii ugu horeysay ee isafgaranwaaga  SNM dhexdooda ka jiray loo adeegsado awooda dawlada Itoobiya . Isafgaranwaagu  waligiiba wuu jiray ee wadahadal iyo wadatashi ayaa lagu dhameyn jiray,meel dhexena layskugu iman jiray. Saraakiishaasi waxa  la xidhay bishii Febraayo 1,1988 waxaana la soo daayey bishii Abril 27,1988.Waxaa saraakiishaasi kala ahaayeen  Maxamed Cilmi Galaan, Muuse Biixi Axmed, Dhagaweyne,.Waxaa sii dayntooda ka qayb qaatey  xubno dibada ka yimid iyo xubno gudaha laga abaabulay.

Xilligan waxaa  isbadal weyn lagu sameeyey qorshihii dagaal ee SNM. "Jabhadaha waxaa caado u ah inay  xadka ka soo bilaabaan,magaalooyinka waaweyna ku danbeeyaan.Hase yeeshee hawlgalka SNM wuu ka duwanaa  taa oo magaalooyinkii waaweynaa ayaa qabsashada lagaga bilaabey" ayuu yidhi Mujaahid Ibraahim Maygaag oo ka warameyey waxay SNM  kaga duwan tahay jabhadaha aduunka soo marey.Mujaahid Ibraahim Maygaag dhawaan bishii Janaayo 31 2011 ayuu ku geeriyooday cariga Jabaan. Waxaa kaluu Ibraahim Maygaag talo u soo jeediyey qolyaha aqoonta ciidamada leh inay  baadhis"research" ku sameeyaan arintani oo ku ugub ah hawlgalada jabhadaha aduunka.

Waxaa abaabul weyn laga galay xerada ciidamada ee Awaare.Waxaa ciidamadii loo qaybiyey laba qaybood Madiina ( Burco) iyo Maka (Hargeysa). Sidii qorshuhu ahaa waxaa habeenimadii May 27,1988 la galay magaalada Burco.Shidaalka oo sidii la filayey ama qorshuhu ahaa aan loo helin ayaa ku keenay dibudhac gudagalkii magaalada Hargeysa.Hase yeeshee habeenimadii May 31,1988 ayey galeen xerada "qaybta 26",.horena ugu socdeen ilaa Birjeex.Waxay ciidamada SNM-tu lugta mariyeen dhamaan xeryihii Qaybta, Birjeex, Miiska Saraakiisha, iwm.Waxaa ciidamadii faqashta ahaa gurmad uga yimid aaga Dhagax Madoobe.Ciidamadii SNM-tuna qaybta uu Cabdisalaan ku jiray waxay isku urursadeen aaga hudheelka Union-ka.Waxay Ciidamadan SNM-tu maqleen in ciidamo ilaa 500 ku dhaw oo Koonfur laga keenay lagu soo dejinayo gurigii "Rest House" una dhaqaaqeen aagasi.Cabdisalaan markan waa dhaawac oo Kelida ayey xabadi kaga dhacdey.Nabarka waa la tolay.Xilligan waxaan jirin ama yaraa qalab ay adeegsadaan dhakhaatiirtii xilliga oo ay ka mid ahaayeen Axmed Cali Askar, Aadan Beergeel, iwm.

## Tilmaamaha Mujaahidka:

Mujaahid Cabdisalaan Turki waxaa lagu tilmaamaa inuu af-gaaban yahay.Mujaahid Cabdisalaan waa dadka had iyo jeer jecel una hawlgala midaynta bulshada.Saaxiibadii waxay ku tilmaamaan inuu ka mid yahay dadka faro ku tiriska ee ka koray soohdimaha qabyaalada.Waa bulshaawi furfuran, qof kastana u muujiya ixtiraam, runta had iyo jeer u gargaara.Wuu ku dadaal badan yahay ku dhaqanka diinta. "caruurta diinta bar oo Quraanka bar ha ii soo akhriyaane, si aan u soo noqonba Ilaahaybaa garanayee" waxay ka mid ahaayeen dardaarankii dheeraa ee kaga tagey xaaskiisa,markii uu ku si socday dagaalkii gudagalkii dalka ee 1988[kii].

"Mar la waydiiyey Mujaahid Lixle saraakiisha laysku haleyn karo ee uu wacyi galiyey ,wuxuu yidhi tirada Saraakiisha aan guubaabiyey ee laysku haleyn karo waxaa ka mid ah Turki" waxaa sida nala wadaagey mujaahid Maxamuud Maxamed Xayd. Turki wuxuu ka mid yahay saraakiisha tirada yare ee aan isku dhalanrogin siyaasi.

Waxaa Turki lagu baadisoocaa dulqaad iyo dad ladhaqan dheelitiran. " Waxaan si gaar uu ugu mudan yahay degnaanshiiyo, ah shidanaaba shidan, akhlaaq wanaag iyo dad la socod. Marka inta kale laga tago waxaan la ilaawi karin doorkii uu ka ciyaaray: la baxii Cabdillahi Askar , iyo

dagaal kii buuraha. Geesinimadda ka sakow, waa nin dheelitiri wajibka guud iyo ka gaarka ah ee qoskiisa oo dhinac u dulaamin oo mid kasta si heer sare ah u dhaliil tire" waxaa sidaa nagu soo kordhiyey Mujaahid maxamed Yaasiin "Colaad" oo ka mid ahaa halgamayaagii SNM .

Cabdisalaan Turki wuxuu degan yahay cariga Ingiriiska.Turki iyo xaaskiisa Layla waxa Ilaahay ku maneystay lix caruura(saddex wiil iyo saddex gabdhood), afar ay awoow iyo ayeey kala yihiin.Waxaa Ilaahay mahadii ah in halgankii uu Turki galay ,Layliina ku taageertay uu midho dhaliyey oo maanta Somaliland jirto.

Mahadnaq:
Bahda Mareegta Farshaxan waxay u mahadnaqeysaa mujaahid Turki iyo mujaahidad Layla oo runtii intii uu socday qoraalkani noo yeeshay dulqaad farobadan,suurtogaliyeyna qoraalkani inuu yeesho tayo.Waxaa kaloo mahadnaq mudan dhamaan dadkii aanu la yeelanay wareysiyada ee si qalbi furan ah noo soo dhaweeyey..

Raadraac:

-Qolka kaydka Mareegta Farshaxan
-Mareegaha Hadhwanaagnews,Oodweynenews, Gabileynews,TogaHerer,Haatuf.
-Wareysi Cabdiraxmaan Baqdaadi
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Dr.Aadan Beergeel
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Rashiid Sh.Cabdilaahi
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Maxamed Beergeel
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Maxamuud Maxamed Xayd
(Bahda Mareegta Farshaxan)
-Wareysi Maxamed Cilmi Galan

Fu’aad Sh,
Mareegta Farshaxan

(Bahda Mareegta Farshaxan)

-Wareysi Khadar Aadan Koodadbuur

(Bahda Mareegta Farshaxan)

Qalinkii iyo Tifatirkii:

Fu,aad Sh.Abuubakar

Bahda Mareegta Farshaxa